

# Loo-shaqeeyaha Cusub ee Daryeel Bixiyeyaasha Shakhsiga ah



## Sidee bay tani u anfacaysaa IP-yada?

- Ikhtiyaaro dheeraad ah oo loogu talagalay diiwaangelinta saacadaha la shaqeeyay (telefoonka gacanta, kombiyuutar internet ku xiran, wacitaan telefoon ama qalab guriga dhexdiisa yaalla)
- Kaalmada xagga lacag-bixinta, tababarka iyo xaqijinta aqoonta
- Caawimaad fool-ka-fool ah
- Isuduwayaasha Adeegga Loo Xilsaaray
- Koboca iyo haysashada shaqaalaha

## Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Xog-ogaal u noqo Mashruuca CDE  
[www.dshs.wa.gov/altsa/cde](http://www.dshs.wa.gov/altsa/cde)

- Is-qor si aad iimaylka ugu hesho wararkii ugu dambeeyay ee mashruuca Loo-shaqeeyaha Ku Jihaysan Macmiilka (Consumer Directed Employer).
- Is-qor si aad uga qaybgasho siminaarka internet-ka ka dhaca ee macluumaadka lagu bixiyo ama kullanka daneeyaha.
- Dib-u-eeg Agabkii iyo Kheyraadyadii ugu dambeeyay.

## Nagala Soo Xiriir

Email-ka:  
[CDE@dshs.wa.gov](mailto:CDE@dshs.wa.gov)

Bogga internet-ka:  
[www.dshs.wa.gov/altsa/cde](http://www.dshs.wa.gov/altsa/cde)



## Loo-shaqeeyaha Ku Jihaysan Macmiilka

Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida  
Maamulka Naafonimada Koritaanka

## Maxaa dhacaya?

Sannadka 2021, Consumer Direct Washington (CDWA), oo ah shirkad gaar loo leeyahay, ayaa noqon doonta Loo-shaqeeyaha Ku Jihaysan Macmiilka ee loo yaqaanno Consumer Directed Employer (CDE) ee Gobolka Washington. Shirkadda CDWA ayaa noqon doonta cidda ay u shaqeeyaan dhammaan Adeeg-bixiyaasha Shaksiga ah (IPs) ee daryeelaya macaamiisha adeegyada ka helaya Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS).

## Waa kuma cidda ay tani saameyn doonto?

Tani ayaa waxay saameyn doontaa IP-yada qandaraaska kula jira DSHS iyo macaamiisha adeegga ka hesha IP-ga.



## Maxaa isbeddeli doonna?

- IP-yada ayaa noqon doonna shaqaalaha CDE waxaanna meesha ka baxaya qandaraaskii ay kula jireen DSHS.
- Oggolaanshayaasha ayaa loo sameyn doonnaa CDE beddelkii IP-yada.
- CDE-yada ayaa waxay lacag-bixintooda siin doonnaan IP-yada.
- Macaamiisha iyo IP-yada ayaa CDE kala xiriirri doonna su'aalaha IP-ga la xiriira.
- Mas'uulyadda macmiilka ayaa waxaa si toos ah ula wareegi doonna CDE.
- Macaamiisha waxay kala shaqeyn doonnaan CDE iyo IP hawlahaa saacadaha la oggolaaday.
- Nidaamka CDE ayaa wuxuu taageeri doonnaa Xaqijinta Booqashada Elektarooniga ah (EVV).
- Maalmaha lacag-bixintu waxay noqon doonnaan labbadii toddobaadba mar (toddobaad dhaaf).
- CDE waxay yeellan doonaan hab lagu xallinayo dhibaatada oo loogu talagalay macaamiisha iyo IP-yada.

## Maxaa sidoodii sii ahaan doonna?

- Macaamiisha waa loo-shaqeeyaha maamula oo go'amiya cidda daryelka bixinaysa iyo goorta adeegyada loo ballaminayo.
- Xadadka toddobaadka shaqada iyo waqtiga dheeraadka ah
- Maareeyaha kiiska oo qimeynaya heerka dheefta oggolaanayanna adeegyada
- Shuruudaha xaqijinta aqoonta, tababarka iyo baaritaanka raadraac ee DOH
- Heerka mushahaarka iyo dheefaha

## Waa maxay tallaabooinka xiga?

1. Macluumaadkaaga shakhsiyeed ka dhig kuwa hadda ah oo IPOne ku jira, oo ay ka mid yihiin cinwaanka boostada iyo email-ka.
2. Waqtiga la socodsii tababarka iyo baaritaannada raadraaca.
3. Haddii aadan horey u heli jirin lacag-bixinno elektaroonig ah, ku qor nidaamka xawilaadda maaliyadaha elektarooniga ah (EFT) xisaabtaada bankiga ama dooro in aad hesho kaarka ammaahda ee ALINE Pay.
4. Ka Qaybgal siminaarrada CDE ee internet-ka ka dhacaya si aad ula socoto wixii ku soo kordha.
5. Ku xirnow si aad u oggaato goorta ay isbeddelladu dhici doonnaan.

